**XEER l. 9. rep.**

## MAAMULKA WALAAYADDA EE SOOMAALIYA
## MAAREEYUHU

MARKII UU ARKAY qaanuunka lambarkiisu yahay, 61 soona baxay 26 Sabteembar 1950; kaas oo lagu asaasay dugsiga diyaarinta siyaasadda & maamulka, sida uu qabo xeerka 4 ee amarka kor ku tilmaaman in ay lagama maarmaan tahay in la dejiyo habraac haga nadaamka uu ku shaqaynayo dugsiga kor lagu xusay;

MARKA UU DHEGEYSTAY ra'yiga golaha dhexe ee dugsiga.

## WUXUU XEEREEYAY

### Qod. 1

Waxa la ogolaaday habraaca mideysan, kaasoo ka mid noqonaaya kana go'i karin amarkaan, lana xiriira wax qabadka dugsiga diyaarinta siyaasadda iyo maamulka, iyo magacaabidda iyo meeleynta gunnooyinka shaqaalaha.

### Qod. 2

Qarashaadka ka dhasha shaqa gelinta amarkaan waxa la saarayaa qodobka 67aad ee xisaab celinta ee sannadkaan iyo kuwa u dhigma ee sanooyinka soo socda.

### Qod. 3

Sannad maaliyadeedka socda waxa loo qaatay masuuliyadda qodobka hore iyo kharashaadka uu leeyahay, ballan qaad dhan So. Sh.40,000 (afartan kun.)

### Qod. 4

Amarkaan waxa uu dhaqan gelayaa taariikhda lagu soo daabaco faafinta rasmiga ah ee maamulka loo aaminay maamulidda Soomaaliya, wuxuuna ka billaabanayaa 1 setteembar 1951.
Mogadiscio, 18 jennaayo 1952.

MAAREEYAHA
**Fornari**

## NADAAMINTA WAXBARIDDA IYO MAAMULKA
## DUGSIGA DIYAARINTA SIYAASADDA IYO MAAMULKA
## EE SOOMAALIYA

---

## KOOWAAD

Waxa qabadka waxabaridda

### Qod. 1

Dugsiga diyaarinta siyaasadda iyo maamulka ee Soomaaliya waa machad ku takhasusi dhaqanka iyo farsamada oo leh ulajeeddo ah in la horumariyo aqoonta hey'adaha siyaasadda iyo maamulka dowladeed.

## Qod. 2

Waxa la aqbalaa dalbadayaasha heysta shahaaddada dugsiga hoose/dhexe ama wax u dhigma oo kale in dugsiga lagu qoro, ayna yihiin dad u qalma in ay imtixaan gaar ah galaan sannad walba bisha Luulyo, habraacana uu sameynayo Maareeyaha.

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay curin qoraal ah oo lagu qoro luqada talyaaniga ama luqada Carabiga, iyada oo qof walba uu dooranayo tii uu doono. waxa wax laga qorayaa aqoonta guud, iyo waxa jiro wareysi u dhexeeya dalbadaha iyo imtixaan qaadayaasha kuna saabsan aqoonta guud.

Guddiga imtixaanka waxa uu ka kooban yahay macalimiinta dugsiga oo uu guddoomiye u yahay maamulhu.

Dalbadayaasha keensada rukhsad ama shahaaddo dugsiga sare ah waa loo ogolaanayaa dugsiga imtixaan la'aan.

Da'da ugu yar ee la ogolaan karo dugsiga dowrada koowaad waa 18 jir.

## Qod. 3

Dugsiga waxa uu ka kooban yahay saddex dowro sannadle ah midwalba soconeyso todobo bilood oo lagu baran doono casharrada soo socda:

a) taariikhda ilbaxnimada, dowrada 1aad, 2aad iyo 3aad (laba saacadood waxbarid ah usbuucii mid walba);
b) qaanuunka dowliga, dowrada 1aad, 2aad, iyo 3aad (laba sacadood usbuucii mid walba);
c) Sharciga caalamiga iyo nidaamka Qaramada Midoobay, dowrada 1aaad, 2aad, iyo 3aad (hal saac usbuuciiba mid walba);
d) hey'adaha Islaamiga, dowrada 1aad, 2aad, iyo 3aad (laba saacadood usbuucii mid walba);
e) afkaarta qaanuunka gaarka ah dowrada 1aad, 2aad (laba saacadood usbuucii mid walba);
f) afkaarta qaanuunka ciqaabta maadada 3aad (laba saacadood usbuucii);
g) afkaarta siyaasadda dhaqaalaha dowrada 2aad (hal saac usbuucii);
h) afkaarta dhaqaalaha iyo cilmiga xisaabaadka iyo isla xisaabtanka guud ee dowladda dowrada 2aad, 3aad (laba saacadood usbuuci mid walba);
i) nadaamka Soomaalida, dowrada 3aad (laba saacadood usbuucii);
l) jogoraafiyada siyaasadda iyo dhaqaalaha si gaar ah tan Afrika dowrada 3aad (laba saacadood usbuucii);

casharro dheeri ah:

a) Naxwaha talyaaniga, dowrada 1aad (saddex saacadood usbuucii, iyo dowrada 2aad (laba saacadood usbuucii);
b) Naxwaha carabiga, dowrada 1aad (saddex saacadood usbuucii), dowrada 2aad (laba saacadood usbuucii);
c) Xisaabta dowrada 1aad (laba saacadood usbuucii), dowrada 2aad (hal saac usbuucii);
d) Culuumta fisikada iyo dabiicadda dowrada 3aad (laba sacadood usbuucii).

Dowrad walba barnaamijyada waxa ka heshiinayo macallimiinta dugsiga. Ardayda waxa qasab ku ah in ay soo xaadiraan dhamman casharrada.

## Qod. 4

Sannad waxbarasheedku waxa uu ka billowdaa 1da bisha agoosto waxana uu ku dhammaadaa 31 luuliyo ee sannadka xiga. Dowrad walba waxa ay bilaabataa 1da agoosto waxana uu dhammaadaa 28 feberaayo ee sannadka xiga.

## Qod. 5

Macallimiintu waxa ay khiyaar u leeyihiin in ay sameeyaan layliyo camali ah qof qof ama wadajir maaddooyinka waxbaridda si loo xoojiyo fahamka casharrada.

## Qod. 6

Waxbarasha sannadeed walba waxaa loo qaybiyey laba xilli, kan hore waa afar bilood, kan labaadna waa saddex bilood. Dhammaadka xilliga 1aad macallimiintu waxa ay qiimeynayaa si wadajir ah wax qabadka dugsiga ee arday walba, waxayna soo saarayaan qiimeyn guud ee arday walba. Qiimeyn kasta waxa ay ka kooban tahay, indhaindhayn iyo tala soo jeedinno kuwaas oo ay dhici karto in ay wax tar u leeyihiin horumarinta waxbarashada arday walba.

## Qod. 7

Dhammaadka xilli kasta waxa la qabanayaa imtixaanaadka dowrooyinka oo dhan. Imtixaanaadka waxa ka kooban yihiin:

a) gudasho, laba imtixaan qoraal mawduuc ku saabsan qaanuunka (oo lagu qaadayo luqada talyaaniga) iyo mawduuc asaasi ah oo ku saabsan mawduuc kale oo uu dooranayo guddiga waxbaridda (oo lagu qaadayo luqada talyaaniga ama luqada carabiga hadba tan ardaygu doorto);
b) Imtixaan afka ah oo maaddo walba ah (oo lagu qaadayo luqada talyaaniga marka laga reebo naxwaha carabiga oo lagu qaadayo luqada carabiga);

Qiimeynta imtixaanaadka waxa sameynaya saddex guddi oo ka kooban: guddi macallimiinta dhiga qaanuunka, midna macallimiinta dhiga maaddooyinka asaasiga ah, midka saddexaadna waa macallimiinta dhiga maaddooyinka casharrada dheeriga ah.

Guddiga imtixaanku waxa uu heysta 10 dhibcood oo lagu qiimeynayo imtixaan kasta. Natiijada imtixaan kasta oo qoraal ah waxay isku celceliska la sameysaa imtixaannada afka ee ku saabsan isla maadada imtixaanka la qaaday.

Si loo helo ku filan imtixaan kasta, arday walba waxaa waajib ah in uu keeno ugu yaraan 6 dhibcood maaddadiiba.

Ardayda aan helin ku filnaan imtixaannada afar ama ka yar waxa loo ogolaan in uu ku soo celiyo imtixaannada celiska ee dhacaya luuliyo intaa aan duruustu billaaban ee sannad dugsiyeedka xiga.

Ardayda la imtixaanay in ka badan afar jeer loo ogolaan mayo imtixaanka celiska waxaana ku waajiba in ay ku soo celiyaan fasalki.

Ardaydii ka maqneed dugsiga in ka badan seddex meelood hal meel duruusta, waa ka reeban yihiin in ay ka qayb qaataan imtixaannada, go'aanka guddiga waxbaridda.

## Qod. 8

Dhammaan dowrada seddaxaad imtixaanaadka gaarka ah kadib waxaa la qabanaa imtixaanka deboloomada, waxaana la aqbalaa ardayda helay dhibco ku filan dhammaan imtixaanaadkii dowradii ugu dambeysay.

Imtixaanka deboloomada waxa uu ka kooban yahay:

a) gudasho, seddex imtixaan oo qoraal ah, mawduuc ku saabsan howlaha sharci yaqaannada, (sharicga dowliga, sharciga caalamiga ah iyo nadaamiyaha Golaha loo dhan yahay ee Qaraamada Midoobay, hey'adaha islaamiga, fikradaha qawaaniita gaarka ah, fikradaha

xeerka ciqaabta, nadaamka Soomaaliya) ( oo lagu qaadayo luqada talyaaniga); maowduuc ku saabsan kooxda dhaqaala yahannada (fikradaha siyaasadda dhaqaalaha, fikradaha cilmiga maalgelinta, xisaabaadka iyo isla xisaabtanka guud ee dowladda; juqoraafiyada siyaasadda iyo dhaqaalaha), iyo mawduuc ku saabsan ilbaxnimada (labada imtixaan ee ugu dambeeya waxa lagu qaadi karaa luqada talyaaniga ama luqada carabiga, hadba sida uu doorto musharaxa);

b) hal imtixaan oo afka ah kana kooban waraysi lagu qaadayo luqada talyaaniga oo ku saabsan maadooyinka asaasiga ah una dhexeynaya ardayga iyo guddiga macallimiinta dhiga maadooyinka laftooda oo isu tegay.

Qiimeynta macallimiinta ee imtixaanka diboloomada waxa lagu bixyaa si wadajir ah oo leh habboonaan dhameystiran iyada oo lagu xisaabtamayo natiijooyinkii imtixaanka qoraalka iyo kan afka.

Imtixaanka qoraalka ah waxa qiimeynayo laba guddi oo fiirinaayo qoraalna ku soo saaraya aragtidooda una gudbinaya guddiga macallimiinta dhiga maadooyinka asaasiga ah, waxana ay ka kooban yihiin macallim dhiga maaddooyinka sharciga (imtixaanka 1aad ee qoraalka), iyo macallim kale oo dhiga maaddooyinka asaasiga kale (labada imtixaan qoraal ee kale).

Ardaydii imtixaanka ku celiska laga qaaday waxa loo ogolaanaya in ay ku celiyaan imtixaanka dibloomada ayna galaan imtixaanka ku celin luulyo ka hor billowga casharrada sannad dugsiyeedka xiga.

Ardayda la caddeeyo in ay ku habboon yihiin waxa la siinayaa diboloomada dugsiga.

## LABAAD

Shaqaalaha waxbaridda iyo xubnaha waxbarista

### Qod. 9

Waxa wax ka dhigayo dugsiga macallimiin uu soo magacaabay Maareeyaha asaga oo dhegeystay ra'yiga Madaxa Xafiiska Caafimaadka iyo wacyigelinta dadweynaha ee Maamulka Talyaaniga ee loo aaminay Maamulidda Somaliya..

Magacaabidda waa uu ka noqon karaa Maareeyuhu markasta.

### Qod. 10

Guddiga waxbaridda waxa ay ka kooban tahay macallimiinta dhiga maaddooyinka asaasiga ah iyo kuwa casharrada dheerig dhiga. Waxa ay masuul ka yihiin nadaaminta iyo wax qabadka dugsiga, waxana u madax ah Maamulha dugsiga.

Sidoo kale Guddigu:

a) wuxuu sameeyaa dhaleeceyn, ka joojinta ku meel gaar ah ee ka qeybgalka xisooyinka muddo aan ka badnayn 10 maalmood iyo ka cayrinta dugsiga edbin darted ee ardayga ku xadgudba, kadib markii la dhageysto caddeymaha dhinacyada ay khuseyso; ka soo horjeedka arrinta ka cayrinta dugsiga, waxa la aqbalaa rafcaanka Xafiiska Caafimaadka iyo wacyigelinta Dadweynaha ee MTMS oo gaaridoona go'aanka ugu dambeeya.

b) siinta go'aanada kama dambeysta ah ee ku saabsan codsiyada ku aaddan mihnadaha dugsyeedka ee ardayda.

Gudiga waxaa isugu yeeri karo Maamulaha dugsiga ama sedex meelood meel macalliminta.

### Qod. 11

Maamulaha dugsiga waxa wareegto ku magacaaba Maareeyaha Maamulka marka uu arko soo jeedinta Madaxa Xafiiska Caafimaadka iyo wacyigelinta dadweynaha, MTMS.

Maamulaha dugsiga waxaa waajib ku ah in uu dhigo ugu yaraan sagaal saacadood usbuucii, maamulana wax qabadka dugsiga iyo waxbaridda, umana bannaano maamulaha in uu goblka howl kale ama shaqa joogto ah ka qabto waqtiga xilka uu hayo.

**Qod. 12**

Macallimiinta dugsiga waa in ay heystaan shahaadada Laawuriyada ama wax u dhigma. Xagga dhigidda carabiga iyo nidaamka Islaamka waa laga dhaafi karaa shuruudaha kor ku xusan, waase haddii uu caddeeyo in uu maaddada si qoto dheer u yaqaanno.

Waxa la xaddidaa mushaarka macallimiinta iyada oo lagu qiyaasayo sh So. 100 bishii, saacad walba ee usbuuca waxbarida.

Waxaa la bixyaa gunno ka qayb galayaasha imtixaanaadka lacag la'eg tan loo qoondeeyey xubnaha guddiga imtixaanka dibloomada si ay u helaan shahaaddada dugsiga sare.

Maamulaha dugsiga waa in uu heystaa shahaaddada Laawuriyada ee sharciga lehna awood macallinimo ee maddooyinka sharciga, ama darajo u dhiganta oo jamacadeed ama waxbarasho dugsiga sare.

**Qod. 13**

Wareegtada magacaabidda maamulaha waxaa ku cad muddada xilka iyo mushaarka billaha ah.

Mushaarka la sheegay kama badan karo kan loo qoray darajada A, ee shaxda ku lifaaqan wareegtada ee nadaam n. 62, sona baxay 15 Setembar 1950.

Haddii uu shqaale ka yahay maamulka, waxa uu masuul ka yahay la falgalka dhaqaalaha kuwa ku derejada ah.

Marka lagu daro mushaarka billaha ah ee kor ku xusan maamuluhu ma laha gunno kale oo waxbarid ama ka qaybqaadasho imtixaan ama hawl kasta oo dugsigu qabanayo.

**Qod. 14**

Maamulaha iyo macallimiinta dugsiga waxa ay ku dhaqmayaan xeerarka edbinta ee u yaala shaqaalaha waxbaridda.

## SEDDAXAAD

Shaqaalaha iyo xubnaha maamulka

**Qod. 15**

Hey'adaha maamulka dugsigu waa maamulaha iyo xoghayaha.

Xoghayuhu waxa uu caawiyaa maamulaha dugsiga. Waxa uuna masuul ka yahay dhowridda dhammaan waxyaabaha la dhaqaajin karo ee uu la wareego, waxa uuna ku qorayaa diiwaanka tirinta agabka dugsiga.

Xoghayuhu waxa kale oo uu masuul ka yahay sameynta iyo ilaalinta diiwaannada rasmiga ah ee dugsigs. Diiwaannada rasmiga ah ee dugsigu waxa ka mida: diiwaanka waxqabadka ardayda iyo diiwaanka tirinta agabka.

**Qod. 16**

Shaqaalaha xoghaynta waxay ka kooban yihiin xoghaye iyo kaaliye. Waxaana magacaaba Maamulka Talyaaniga ee loo amminay Maamulidda Soomaaliya (MTMS) kaas oo si toos ah u maamula.

**AFARAAD**
Xeerka kala guurka

**Qod. 17**

Ilaa si kale loo habeeyo, murashaxiinta aan haysanin shuruudaha looga baahan yahay qodobka 2aad ee xeerka hadda jira waa lagu qori karaa dugsiga, iyada oo aan laga hor joogsanaynin dhawrista habab kale ee lagu xusay isla qodobka.

Arkay: FORNARI